

ABUURIS JACAYL WAX AKHRIS...

Akhriska – ama jeclow ama ha jeclaane – akhrisku waa albaabka laga soo galo aqoonta oo dhan. Hagga carruurta, yeelashada xirfadaha akhriska waxay la mid tahay albaabka oo loo furo wax-barashada sababtoo ah waxay keenaysaa helitaanka aqoonta, ✦ karka iyo xirfadaha muhiimka u ah ku-guulaysiga hagga dugsiga.

Akhrinta guriga ah

Sidee baan carruurteena ugu caawinaa inay wax akhriyaan? Sidee baan carruurta uga dhignaa kuwa jecel akhriska? Dadku waxay badanaa u maleeyaan in carruurta bilaabaan wax-akhriska iyo wax qoridda markay aadaan dugsiga iyo in soo-qaadashada buugga ay tahay tallaabada kowaad ee barashada akhriska. Runtii, samaynta asaaska akhriska iyo qoraalka waxaa la sameeyaa sannadaha ka horreeya intaan ilmahu bilaabin dugsiga. Waayo-aragnimooyinka kala duwan ay carruurta ka

Akhri Buugaagta ugu Xiisaha badan,
mar kale iyo mar labaad iyo mar kale.

helaan markay yar yihiin, sida aadidda meel qoyska oo wadajira, shoobinka, la cayaaridda saaxiibada, waqti-qaadashada whānau, iyo dhammaan wada hadallada ka dhacaya meelahaas, waa baloogyada asaaska ah. Waxaa laga yaabaa inaad waxyaalahaas oo dhan inaad u haysato inay keliya munaasabado bulshadeed yihiin, halka runtii ay u yihiin carruurta waaya-aragnimooyin ay ku jiraan hadal barasho si loogu diyaariyo barashada akhriska.

Mid ka mid ah fureyaasha caawinta carruurta inay u diyaar noqdaan wax akhrinta waa in lala hadlo waxna loo akhriyo – waxay ka

caawinaysaa sidoo kale inay horumariso xirfadaha dhagaysigooda, taas oo muhiim u ah wax-barashada in wax la akhriyo.

Waxaad aadi kartaa maktabadda ama dukaanka buuggagta inaad buug soo wada doorataan. Akhrisku waa inuusan ku koobnaan oo keliya buuggagta – akhri erayada meel kasta oo aad ka hesho. Akhri oo ka wada hadla calaamadaha waddooyinka, calaamadaha dukaanada, waxyaalaha alaabada ku dul-qoran, liiska shoobinka, awaamirta, tikidhada, xataa taagagga magacyada!

Haki, Bidhaami, Ammaan

Adeegso tabahan haddii ilmahaagu uusan hubin erayga.

Sug dhowr ilbiriqsi. Sii waqti ay uga fiirsadaan. Badanaa ayagaa ka shaqeeya. (Haki)

Haddii aysan weli garanayn erayga, isku day dhowrkan arimood oo soo socda: (Bidhaami)

- eeg bilowga erayga. Kala hadal xarfaha iyo codadka. Kala hadal erayada macnaha u yeelaya jumlada
- ilmahaaga ku dhiirigeli inuu sawirada ka eego bidhaamin
- weydii ilmahaaga inuu ku noqdo bilowga jumlada ama uuna sii akhriyo ilaa dhammaadka jumlada.

Haddii uusan weli garanayn eraygii, u sheeg. Ka dibna ku dhiirigeli ilmahaaga inuu akhriyo jumlada mar labaad. (Ammaan) ilmahaaga.

Waxaa kaloo muhiim ah, inaad ilmahaaga u ogoaato inuu ku arko adoo akhriska ku raaxaysanaya – maxaa ka fiican in la soo qaato buug wacan?

Haddii aad jeceshahay inaad kor u qaaddo xirfadahaaga akhriska iyo qoraalka si aad carruurtaada u caawiso, kala xiriir Literacy Aotearoa, 09 378 2080. haddii uusan Ingiriisigu ahayn luqaddaada kowaad, ka eeg: www.tec.govt.nz/education_and_training/english_for_migrants/assessment_access_specialist.htm

KA DHIG MID FAN AH!

Ka-samaynta horumarka xagga dugsiga

Si la mid ah sida carruurta ku barato kuna socoto waqtiyo kala duwan, waxay kaloo carruurta ku sameeyaan horumar qiyaaso kala duwan xagga barashada akhriska. Baraha ilmahaaga ayaa si hoose ula soconaya horumarka isla markaasna hubinaya in waxyaalaha la akhrinayo aysan ku adkayn ama aad ugu fududayn. Haddaad ka walwalsan tahay in ilmahaagu uusan ka samaynayn wax

horumar ah xagga akhriska, waxaa muhiim ah inaad kala hadasho waxaad ka cabanayso barahooda. Taas waxay kaloo ilmahaaga tusaysaa inaad u malaynayso in akhrisku muhiim yahay aadna ku dadaalayso sida wacan oo ay wax u baranayaan.

Maxaa dhacaya haddii uu buuggu aad u adag yahay?

Ilmahaagu waa inuu la socdaa badiba buuggagta ay guriga keenaan, hase ahaatee

haddii uu buuggu ku adag yahay, ku moogaysta inaad akhrisaan jumlooyin ama boggag kala duwan, ama u akhri ilmahaaga sidaas badalkeeda. Haddii uu ilmahaagu badanaa keeno guriga buuggag aad u adag, kala hadal barahooda arintaas. Tilmaanta guud waa, in buuggu badanaa adag yahay haddii ilmahaaga ay ku adag tahay wax ka badan shan eray boqolkiiba.



Fikradaha iyo nashaadyada

- La hadal, la hadal, la hadal—, ilmahaaga keliya ha kula hadlin awaamir, hase ahaatee kala kaftan waxa ka dhaca maalintooda
- buuggag kala duwan si wadajir ah u akhriya in badana akhriya
- u xusha buuggagta xiisaha leh wadajir
- maktabadda u taga wadajir si aad uga soo heshaan buug la jecel yahay oo cusub
- kor wax ugu akhri ilmahaaga
- wada heesa, nashiidooyinka iyo ridmooyinka wadajir u qaada

- ka hadla sawirada buugga ku yaal
- la qaybso farxadda buuggagta ridmooyinka leh — wadajir u qosla, isku day inaad garataan waxa soo socda
- dugsiyada qaarkood waxay waalidiinta ku dhiirigeliyaan inay carruurtooda la yimaadaan maktabadda dugsiga — weydii baraha ilmahaaga waqtiyada maktabadda
- dhagayso cajaladaha iyo CD-yada — maktabaduhu waxay badanaa hayaan kuwa la kala xulanayo
- ku dhiirigeli ilmahaaga inay dib u sheegaan sheekooyinkii la jeclaa —oo ka barten

- buuggagta waayo-aragnimadooda
- ku dhiirigeli ilmahaaga si uu u sameeyo cayaaraha — ka soo qaybgal ama ka mid noqo dhagaysteyaasha!
- cayaara dheelaha erayada — tusaale ‘Simon wuxuu leeyahay’, erayada ritmada leh, ‘I spy’
- curiya nashiidooyin iska liita
- akhri buuggagta mar kasta iyo mar labaad — ku-celcelintu waa waxa loo baahan yahay
- isku soo duubo, wax akhriska ka dhig mid fan ah!

WAQTI GAAR AH OO LA WADAJIRO

Ku samee akhriska ...

- meel degan oo raaxo leh
- waqtiga aad fadhido meel u dhow ilmahaaga
- 10 – 15 daqiiqo oo aan kala gayn lahayn
- waqti gaar ah oo raaxo, iyo xiiso leh
- fursad aad ku ammaanto ilmahaaga.